

# Xarunta Qaadashada Ardayda ee ESL

Dugsiga Hoose ee Haselwood/Dabaqa Hoose, 1325 Bluegrass Avenue, Louisville, KY 40215



Sharciga u degsan Dawladda Dhexe iyo midka goboleedka waxay ka rabaan in Dugisyada Caamka ah ee Degmada Jefersoon ay caddeeyaan ardayda aan Luqaddooda hooyo ahayn Af Ingiriis iyo in ay qiimeeyaan heerka aqoonta ay u leeyihiin Afka Ingiriisiga. Xarunta Qaadashada Ardayda ee ESLka waxay ka caawiyaan qorista iyo qiimeynta ardayda. Si aad ballan u dhigato, fadlan soo wac lambarka telefoonka **(502)485-3623**. Waxaa loo baahanyahay in waalidka ama mas'ulka ardayga uu la yimaado ardayga maalinta ballanka loo qabtay.

## Waxaa loo baahanyahay dokumentiyada iyo macluumaadka soo socda in la keeno:

- **Caddeynta Dhalashada**(I-94, baasaboora ama shahaadada dhalashada)
- **Caddeynta Cinwaanka uu ardayga degganyahay**(heshiiska guriga lagu kireeyey, biilka korontada ama biyaha)
- **Lambarka Food Stambka reerka** (haddii uu jiro)
- **Caddeynta waalidka**(caddeyn Maraykan ah ama Dalka uu ka yimid, Liisenka Baabuur wedista ama kaarka aqoonsiga qunsuliyadda laga bixiyey)
- **Rikoorka/istimaarada(caddeyn dhibco) dugsiyada hore**(haddii ay jiraan)
- **Baarista Caafimaadka ee Kintaaki**(Dugsi walbo way codsadaan weyna qabaan rikoorkan)
- **Shahaadada Tallaalka ee Kintaaki**(Dugsi walbo way codsadaan weyna qabaan rikoorkan)
- **Baarista Caafimaadka Indhaha ee Kintaaki**(Waa in la helaa kama dambeyn Jannaayo 1deeda ee sanadka qorista koowaad)
- **Baarista Caafimaadka Ilkaha ee Kintaaki**

## Xarunta Qaadashada Marka aad Joogto:

- Shaqaalaha ku hadla afafka kala duwan waxay kaa cawin doonaan buuxinta warqadaha looga baahanyahay ku qorista ardayda dugsiyada.
  - Canugga wuxuu qaadanaa imtixaanka Af Ingiriisiga kaasoo go'aamiya haddii isaga/iyada uu xaq u leeyahay/leedahay adeegyada ESLka.
  - Ka qaybgalka barnaamijka ESLka waa ikhtihaar(voluntary).
  - Haddii uusan ardayga xaq u lahayn barnaamijka ESL ama waalidiinta ay go'aansadaan in ay ka tanaasulaan adeegyada ESLka, ardayga waxaa loo diraa dugsiga gurigiisa/gurigeeda loogu tala galey(iyadoo lagu saleynaayo cinwankiisa/cinwankeeda) meelaynta ardayga waxaa lagu saleeyaa Qorshaha Meelaynta Ardayda. Shaqaalaha Xarunta Qaadashada waxay waalidiinta siin karaan macluumaad ku saabsan Dugsiyada Caamka ah ee Degmada Jefersoon.
  - Waalidiinta oggolaadaan adeegyada ESL (oo ka baxsan ardayda imaaneyna ee marxaladda Xannaanada(K) oo waqti hore lasoo qoraayo), waxay helaan wicitaan telefoon ah oo siisa macluumaad ku saabsan meelaynta ardayda dugsiyada, faahfaahin ku saabsan gaadiidka, sharciga dharka la oggolyahay, iyo waxii la mid ah.
- **Carruurta bilaabeyna waxbarashada heerka Xannaanada(KG), canugga waa inuu ahaada 5 jir bisha Oktoobar 1deeda ama ka hor.** Soo wac lambarka telefoonka (502) 485-3623 inta u dhaxeysa **7:30 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama in aad dhigto ballan qoris iyo qiimeyn arday.